



HORUMARKA TURKIGA

51 & HOGAAMINTA ERDOĞAN

TÜRKİYE'NİN GELİŞİMİ VE ERDOĞANIN LİDERLİĞİ

SH. MOHAMED IDRIS AHMED



-CM
ECC

Horumarka Turkiga Iyo Hogaaminta Erdogan

Sh. Mohamed Idris



PUSTAKA PERDANA



1013594



= Turkey's development and Erdogan's Leadership

Copyright © 2021 Sh. Mohamed Idris

All rights reserved.

ISBN:

978-1-5136-8421-5

Basım Yeri:

Kalkan Matbaacılık San. Tic. ve Ltd. Şti.
Büyük San. 1. Cad. No:99/A İskitler / Ankara

Tel: 0.312 341 92 34

www.kalkanofset.com

Midsan Investment, Education, Tourism & International Trade LLC

Sh. Mohamed IDRIS AHMED

Kızılay, İzmir-2 Caddesi No: 47/7 Çankaya / ANKARA

Tel: +90 552 314 14 89

e-mail : idris@midsan.com



PERDANA
LEADERSHIP
FOUNDATION
YATASAN
KEPIMPINAN
PERDANA

TUSMADA

Mahad Celin	5
1 Hordhac Af Turki	7
2 Maxaan u Qoray	17
3 Cutubka 1aad	28
4 Cutubka 2aad	34
5 Cutubka 3aad	42
6 Cutubka 4aad	78
7 Cutubka 5aad	92
8 Cutubka 6aad	110
9 Cutubka 7aad	156
10 Cutubka 8aad	174
11 Cutubka 9aad	200
12 Cutubka 10aad	212
13 Taariikh kooban	225



MAHAD CELIN

Waxaan Ilaahay ka sokow u mahad celinayaa saaxiiba badan oo talo iyo tusaale, xoog iyo xirib, ku daray buugan aad gacanta ku hayso, oo ay ugu horreeyaan saaxiibadayda bahda Midsan Group: Cabdullahi Cabdisalaam Yuusuf - Shahaadada 2^{aad} ee Xoolaha iyo Beeraha, Ankara University, Maxamed Cabdicasiis Xuseen (Azhari) - shahaadada 1^{aad}, Communication & Design, Bilkent University, Ankara; dhanka farshaxanka buugga & IT noo qaabilsan, iyo sidoo kale Eng. Yusuf Abdulkadir Ali, shahaadada 1^{aad}, Industrial Engineering, Jaamacadda Pamukkale, Denizli, qaban qaabada daabacadana hawsheeda qaabilsan.

Waxaan illaawin talooyinka wax ku oolka ah oo ay ila wadaageen saaxiibaday Abdiweli Sayid, shahaadada 2^{aad} ee xiriirka caalamiga, Bashiir Macallin shahaadada 2^{aad} ee culuumta diinta, Istanbul University, iyo Maxamed Cabdimajiid Samatar (Maqosle Bey) jaamacadda Kastamonu culuumta siyaasadda.

Dhamaan walaalahaas wexey igu biiriyeen talooyin wax ku ool ah, gaar ahaan wixii aan ka soo xiganayo warbaahinta afka Turkiga oo dhamaantood si fiican u yaqaanaan. Si gaar ah ayaan ugu mahad celinayaa Cabdullahi Cabdisalam iyo Maxamed Cabdicasiis (Azhari) oo hordhaca afka Turkiga u turjumey. Waxaa sidoo kale mahad mudan Maxamuud Ismaaciil Kulane & Nurhan Akat, oo iyaguna ka qayb qaatay tarjumida iyo turxaan bixinta qaybta afka Turkiga.



GİRİŞ

TÜRKİYE'NİN GELİŞİMİ VE ERDOĞAN'IN LİDERLİĞİ

Hamd alemlerin Rabbi olan Allah'a mahsustur. Salat ve selam da O'nun Resulünerdir.

Neden yazdım: Türkiye'nin Gelişimi ve Erdoğan'ın liderliği?

Bu kitabı yazmamın temel nedeni; Türk halkının ulaştığı gelişim düzeyi ile ülkesini bu noktaya taşıyan Recep Tayyip Erdoğan hakkındaki fikirlerimi, hissiyatımı okuyucuya hem Somalice hem de diğer dillerde aktarabilmektir. Kitabımız iki ana bölümden oluşmaktadır. Birinci bölümde Türk toplumunun ulaştığı gelişim düzeyi ayrıntılı olarak açıklanmıştır. İkinci bölümde ise; Türkiye'de de gözlemlediğim ve uzun zamandır takip ettiğim bu yükselişte Erdoğan'ın etkin rolü ve güçlü liderliği ele alınmıştır. Allah, Türkiye'deki ilerleyişin ve gelişimin temel direği olan Erdoğan'ı korusun.

Dünden bugüne Erdoğan Türkiye'sindeki gelişmelerle ilgili görüşlerimi dile getirmek istedim. Çünkü şahsımın ve diğer yazarların, Türkiye'deki kaliteli yönetimi ve bununla süregelen mucizevi atılımı tarihe not düşmesinin elzem olduğunu düşünüyorum.

Ayrıca ülkeme, milletime ve ülkesini geliştirmek isteyen ya da iyi bir yönetim arzu eden herkese kitapta bahsettiğim gelişim ve yönetim anlayışının iyi bir emsal teşkil etmesi için yazdım.

Türkiye'ye ve Erdoğan'a olan sevgimi inkâr edemem. Nitekim yazılarımda da bu sevgiyi hissedeceksiniz. Seven göz sevdiğinin hatasını görmez deseler de doğruyu görebilmek/aktarabilmek için çaba sarf ettim. 2003 ile 2021 yılları arasında, son 18 yılda

Türkiye'de yaşanan değişim ve dönüşümün tarihe (yeteri kadar) aktarılmadığı kanısındayım. Bu yüzden küçük de olsa bu önemli görevde rol almak isterim.

Türkiye'ye olan sevgim bugüne has bir şey değil. Türkiye sevgim kırk sene önce okuduğum kitaplarla başladı. Ataları Orta Asya'dan gelerek Osmanlı'nın tohumlarını atan Ertuğrul Gazi Selçuklulara uç beyi olarak hizmet etmiş; daha sonra oğlu Osman Gazi tarafından fetihlerle hudutları genişletilmiş ve üç kıtada hüküm sürmüş Osmanlı'yı tanıdığımda başladı.

Okumalarımın tarih üzerine yoğunlaştığı o dönemde Osmanlı tarihi ve tahta geçen sultanlar hakkında çok şey okudum. Özellikle meşhur sultanlar Fatih Sultan Mehmet, Yavuz Sultan Selim, Yıldırım Bayezid, Kanuni Sultan Süleyman ve Sultan Abdülhamid hakkında okumalar yaptım. Allah hepsine rahmet eylesin.

40 senelik süreç içerisinde Türkiye'nin siyasi tarihini de okudum. Prof. Dr. Necmettin Erbakan'ın mücadelesini ve doksanlı yılları yakından takip ettim. Yeni lider Recep Tayyip Erdoğan'ın ortaya çıkışı ise, sevdiği büyükşehir İstanbul'a belediye başkanı olmasıyla başlar.

Son 15 yılda gerek Türkiye'ye gelerek gerek de okumalarıma devam ederek Türkiye'yi yakından öğrenmeye, anlamaya çalıştım. Cumhurbaşkanı Recep Tayyip Erdoğan liderliğindeki Türkiye'nin gelişim ve değişimini araştırdım ve bu eserimde ele aldım.

Çoğu zaman batı medyasının en önemli gazetelerini de okudum. New York Times, Washington Post, Time ve Newsweek, Economist, Guardian ve Independent vb. Bu yazılarda bazen Türkiye'ye karşı bazen de özellikle Cumhurbaşkanı Erdoğan'a karşı nefret duyguları akıyordu. Açıkça anladım ki; onların bu nefreti Erdoğan'ın ülkesine ve milletine hizmetinden dolayıldı.

Bu Kitabın Serüveni Nasıl Başladı?

Olayların ve yazıların bağdaşması için kitabın ortaya çıkış hikayesinden bahsetmek istiyorum.

Uzun zamandır dikkatim Türkiye'nin üzerindeydi. Zaman zaman yapmış olduğum kısa veya uzun aralıklı ziyaretlerde bu ülkeyi gözlemledim. Toplantılara ve programlara katıldım. Bu organizasyonlar özellikle Erdoğan'ın Somali'ye ziyaretinden sonra Türkiye'ye daha çok gelmeye başlayan Somalililere yönelikti.

O dönem Türkiye'de ya da Türkiye dışındayken bu ülke ile ilgili çok şey okuyordum.

Amerika'da ve Avrupa'da iken sabahın erken saatlerinde Türkiye ile alakalı gazeteleri okuduğumu hatırlarım. Türkiye'nin gelişiminin, benim gelişimim olduğunu, güçlerinin gücüm, başarılarının ve huzurlarının benim olduğunu hissedirim. Çünkü bizi birleştiren kardeş kılan Kur'an-ı Kerim ve Peygamberimizin sünnetidir.

2009 yılı Temmuz ayında İstanbul'da bulunduğum sırada seri olarak üç yazı yazmıştım ve şimdiki durumdan farklı olan durumlardan bahsetmiştim.

O seriyi Somalitalk.com'da yayınladım ve başlığını "İstanbul ve Erdoğan Dersleri" olarak belirledim. Bunu yaparken Somali milletine, özellikle bilgi, siyaset ve liderlikle ilgilenenlere Erdoğan'dan alınabilecek dersleri izah etmeye çalıştım.

Sayın Erdoğan'ın yönettiği ve bugün olgunlaşarak 17. yılına giren hükümet, o dönemde başlangıçtaydı. O zaman da devrede olan, - bugün ne kadar zor olsa da- bu hükümeti devirmek ve bitirmektir. Devletin hayat damarları sökülüp devlet dört bir taraftan kuşatılmak istendi. Nitekim yazılarda detaylı bir şekilde okuyacaksınız.

Fakat kardeş ülke Türkiye'nin güçlü yönetimi çok çelme ve kumpas atlattı. Hala düşmanlara karşı mücadelesi devam etmektedir. Tecrübeli politik hamleleriyle bu zorlu mücadelede dik durmaktadırlar. Bu başarı da Allah'ın yardımıyla Cumhurbaşkanı Erdoğan ve ekibinin bilgisi, tecrübesi ve çalışkanlığı önemli rol oynamaktadır.

Mart 2020'de Ankara'ya geldiğimde dünyayı ele geçiren

"Koronavirüs COVID-19" salgını Türkiye gündemini de etkilemişti. Türk Devleti salgından dolayı çeşitli tedbirler almıştı. Bu da birkaç ay evlere kapanmamıza neden oldu. Böylece bekleyen okuma yazma işlerime yoğunlaşmaya fırsat bulabildim.

Geriye dönük yazılarıma baktığımda pek çok şeyin değiştiğini ve önemli olayların olduğunu gördüm. Bunların en önemlisi ve en tehlikelisi başarısız olan Temmuz 2016'daki darbe girişimiydi. Darbecilerin istediği şey; Türkiye'nin Erdoğan liderliğindeki siyasi yönetimini devirmek ve gelişimini engellemektir. Allah darbecilere fırsat vermedi. Erdoğan ve Türk halkının cesaretiyle, ülkeyi devirmek isteyen düşmana karşı çıkıldı ve darbe püskürtüldü.

Sonra İstanbul, Fatih Mehmet Sultan ve Türkiye ile ilgili diğer yazılarımı incelemeye başladım. Onları düzenledim. Araştırmalarımı ekledikten sonra açık ve anlaşılır bir şekilde Somalili okuyuculara ulaşmasını istedim. Diğer dillere de çevrilmesini umuyorum. Özellikle bu dillerden birinin Türkçe olmasını istiyorum ki; Türk kardeşlerimiz duygularımızı, düşüncelerimizi ve kardeşliğimizi bilsinler.

2009'DA DURUM NASILDI?

2009'da Adalet ve Kalkınma Partisi altı senedir ülkeyi yönetiyordu. Bu süreçte anayasa değişti. Başbakanlık rafa kaldırıldı. Erdoğan Cumhurbaşkanı oldu (Bu olayda üzerinde durulması gereken nokta; Cumhurbaşkanı verilen yetki ve görevler ülke işleyişine nasıl katkıda bulunacaktı?)

Cumhurbaşkanının vazife yaptığı dönemde ülkede büyük ilerlemeler oldu. Araştırmalara göre insanların refah düzeyi arttı. Türkiye'deki gelir düzeyi yükseldi. Daha önce iktidarda Erdoğan ile beraber çalışan kimi dostlarla yollar ayrıldı. Bazıları da siyasetten ayrıldı. Cumhurbaşkanı Erdoğan yeni yol arkadaşlarıyla millete hizmet yolunda yürümeye devam etti. Bu değişimler ülkenin siyaseti ve gelişiminde bir şeyler öğrenmek isteyenler için büyük bir anlam taşımaktadır.

2009'DA TÜRKİYE VE ERDOĞAN'IN LİDERLİĞİ İLE İLGİLİ YAZILARIM:

Üç bölüm olan bu yazılardan kısaca bahsedecek olursak;

(dün 29/06/2009 Nairobi'den uçtum İskandinav ülkelerdeki Somalililerin Birliğinin toplantısına katılmak üzere Goteborg, İsveç 2-5/07/2009.

Dün gece eski adı Konstantinapolis olan İslam'ın başkentinde (İstanbul'da) ismini Fatih Sultan Mehmet'ten alan bir semtteki otelde geçirdim. Allah Fatih Sultan Mehmet'i cennetine koysun.

Recep Tayyip Erdoğan başbakan olduğu dönemde ülke yönetimindeki partiyle ilgili öne çıkan iki önemli unsur:

1. Ülkenin son senelerde ulaştığı ekonomik ve siyasi gelişme.
2. Hem içeriden hem de dışarıdan saldırılara rağmen Erdoğan başkanlığındaki partinin siyasi liderlik ve yüksek yönetim kabiliyeti.

Bu iki tespit göstermektedir ki; Erdoğan ve onun liderliğindeki Adalet ve Kalkınma Partisi halktan ciddi bir destek bulmuştur. Bu destek, içeriden ve dışarıdan gelen kesintisiz saldırılara dağ gibi durmuş ve geçit vermemiştir.

O yazıda Adalet ve Kalkınma Partisi'ne karşı kurulan komplolardan bahsettim:

(Parti iki kere kanunen siyaset dışına itilmeye çalışıldı ve yönetimi de hapse atılmak istendi Üst düzeyde planlanan bu olayda Anayasa Mahkemesi'ne sunulan gerekçe şu şekildeydi: "Adalet ve Kalkınma Partisinin Türkiye'nin laik düzenini ortadan kaldırmaya teşebbüs ettiğini, ülkenin kural ve kanunlarını çiğnediğini, dolayısıyla Anayasa mahkemeden bu partinin resmi olarak kapatılmasını, mal varlığında el konulmasını, yönetimden 70 kişinin hapse gönderilmesini talep etti. Asıl hedef başbakan Recep Tayyip Erdoğan ve Cumhurbaşkanı Abdullah Gül'dü. Bu olay yaklaşık 4 ay ülkeyi sarstı. Ülkenin başıboş duruma düşmemesi için mahkeme bu

davanın düşmesine karar verdi. Parti Allah'ın fazileti ile bir oyla kapatılmaktan kurtuldu.

2009'da yazdığım serinin ikinci bölümünde Adalet ve Kalkınma Partisi ile ülkedeki ekonomik canlanmayı ele aldım. Özellikle yabancı yatırımcıyla ülkeye giren para yeni istihdam alanları yaratarak vatandaşın refah düzeyini artırdı. Bu kitabımda değindiğim önemli noktalardandır.

Serinin üçüncü bölümünde ise, o dönem Başbakan olan Recep Tayyip Erdoğan'ın siyasi liderliğinden alınabilecek beş ders hakkında yazdım:

1) Birinci ders: büyük hedeflere ulaşmak için, konusunda uzman kişilerle yapılmış adım adım uygulanacak bir plan gerekir. Adalet ve Kalkınma Partisini de başarıya ulaştıran budur.

2) İkinci ders: Liderliğin olmazsa olmazı; şahsiyetli duruş ve nitelikli çalışma tarzıdır. Bunun getirdiği yönetim anlayışıyla halkın sevgisini kazanabilmektir. Recep Tayyip Erdoğan'ın bu kadar sevilmesindeki diğer en önemli etkenlerden biri de sözlerinin arkasında durmasıdır.

3) Üçüncü ders: Halkın desteğini kazanmak halka hizmetle olur: Eğitim, sağlık altyapısı vb.

4) Dördüncü ders: Gerçek bir lider halkını gözetmeli ve halkının duygularını dikkate almalıdır. Sözleri, konuşması ve duruşuyla halkın sevgisini kazanmalıdır. Erdoğan bu konuda çok başarılı bir politikacı ve her zaman doğaldır. Kendisi cesur bir politikacı, açık sözlü ve İslam konusunda hassas biridir. Bunlara örnek olarak okuduğu şiir için hapis yatması, Peygamberimiz hakkında çizilen nahoş karikatürlere karşı Peygamberimizi savunması, İsrail Cumhurbaşkanı'na karşı Davos çıkışı hatırlanabilir. Nitekim Davos'ta toplantıdan öfkeyle ayrıldı ve aynı gece İstanbul'a döndü. Bu Erdoğan'ın insana sahip çıkan ve adalete değer veren bir lider olduğunun göstergesidir.

5) Beşinci ders: Bir lider hedeflerini ve bu hedeflere giden yolda çalışma arkadaşlarını iyi belirlemelidir. Erdoğan bunu başarmıştır. Kendi kalkınma vizyonuna uygun hareket edebilecek, bilgili ve tecrübeli insanlarla çalışarak isabetli bir seçim yapmıştır. Bu yüzden siyaset, ekonomi, eğitim, sağlık, kamu işleri ve altyapı konularında nitelikli bir grup ile çalışmaktadır.

Türkiye'nin kalkınması ve Erdoğan'ın liderliğinden öğrenilecek dersler adlı makale serisini yazalı on yılı geçti.

10 Yıl Sonra

Son 10 yılda Türk siyasetinde, toplumunda ve ekonomisinde çok şey değişti. Dünyada da çok büyük değişiklikler yaşandı. Ancak Adalet ve Kalkınma Partisi (AKP) ve lideri Cumhurbaşkanı Recep Tayyip Erdoğan 2003'ten günümüze iktidarda kalmayı başardı.

Son 10 yılda Türkiye ve dünyadaki değişimlerle beraber benim fikirlerimde değişti. Bu ülkeyi artan bir ilgiyle izlemeye devam ettim. Türkiye ve Sayın Erdoğan hakkında daha çok araştırma yaptım. Tüm bu gayretimi bu kitapta okuyacaksınız.

FETÖ'nün 15 Temmuz 2016 Darbe Girişimi

Türkiye'de son on yıldaki en büyük olay FETÖ'nün 15 Temmuz 2016 tarihinde darbe girişiminde bulunmasıdır. Cumhurbaşkanı Erdoğan ve AK Parti devrilmeye çalışıldı. FETÖ, Cumhurbaşkanı Erdoğan'a (Allah korusun) suikast girişiminde bulunarak ülkenin yönetimine el koymaya çalıştı.

Bu çok titiz bir şekilde planlanmış bir olaydı. Hem yurtdışından hem de yurtiçinden destekleyenler vardı. Ancak başarısızlığa uğratıldı. Akşam saat dokuzda başlayan bu kalkışma halk desteğiyle sabaha karşı bertaraf edildi.

15 Temmuz darbe girişimi Türkiye ve Türk halkının düşmanları tarafından planlanan en tehlikeli olaydı. Ancak Allah zalim darbecilere yardım etmedi. Cumhurbaşkanı Erdoğan ve Türk halkının gösterdiği cesaret ve Allah'ın yardımı ile bu darbe girişimi

hüsrana uğratıldı.

Kitapta 15 Temmuz darbe girişimi ve buna kalkışan FETÖ adlı terör örgütü hakkında daha fazla bilgi verilecektir.

Yeni eklediğim Kısımlar

İlave kısımlarda Türkiye'nin durumu ile o zaman (2009) Türkiye'nin başbakanı ve bugün ise Cumhurbaşkanı olan sayın Erdoğan hakkında bilgi verilecektir: Ülkenin anayasasında yapılan değişikliklerin ardından başbakanlığın kaldırılması gibi.

2009'daki yazılarıma eklemek istediğim noktalar aşağıda sıralanmıştır:

- 1) Cumhurbaşkanı Erdoğan liderliğindeki AK Parti hükümetinin başarıları ve yükselişi, son on yılda Türk halkına sağladığı katkılar.
- 2) 2003 yılından bugüne değin Türk halkının her seçimde Cumhurbaşkanı Erdoğan'ı tercih etmesinin sebebi.
- 3) Cumhurbaşkanı Erdoğan'ın, Türk halkının gönlünü kazanmasındaki en büyük etken kamu yararını gözetmesi ve ülkeyi benzeri görülmemiş bir dönüşüme götürmesidir. Bu Erdoğan liderliğinin ayırıcı vasıflarındandır.

Bu dönem içinde Türkiye'de gözlemlediğim ve edindiğim bilgileri bu noktalarda özetleyeceğim.

Kitapta ayrıca Türkiye-Somali ilişkileri ve Türkiye'nin Somalili kardeşlerine verdiği destek ele alınmıştır. Bu dünya rekabetinde birlikte yaşama kültürünün topluma sağladığı faydaları anlatmaya çalıştım.

Bu kitapta, Türkiye'nin Cumhurbaşkanı Erdoğan ve AKP ile kısa zamanda nasıl uluslararası bir aktör haline geldiğini anlatmaya çalıştım. Kitabımın, Türkiye'nin yükselişi hakkında iyi bir fikir vermesini umuyorum.

Cumhurbaşkanı Erdoğan'a, onunla omuz omuza çalışanlara, Türk

halkına ve genel olarak Müslümanların ve dünyanın iyiliği için çalışan herkese dua ediyorum.

Mohamed İdris Ahmed

Ankara, Türkiye

1 Mart 2021 / 17 Receb 1442

Horumarka Turkiga iyo Hogaaminta Erdogan

MAXAAN U QORAY?

Mahad oo dhan Ilaahay baa leh, Nabad iyo naxariisina nebigeenna korkiisa ha ahaato.

Maxaan u qoray buugan: Horumarka Turkiga iyo Hogaaminta Erdogan?

Waxaan u qoray inaan kaga hadlo oo akhristaha afka soomaaliga iyo afafka kaleba ugu weriyo dareenkayga labada qaybood ee kitaabku ka kooban yahay oo ah: Horumarka uu gaarey dalka iyo dadka turkigu oo aan indhahayga ku arkay, muddo dheerna aan la socdey oo u kuur gelayey, iyo qaybta labaad oo aan ku werinayo hogaaminta wanaagsan ee Madaxweyne Recep Tayyip Erdogan Ilaahay ha xafido oo udub dhexaad u ah horumarkaas Turkiga u hirgalay.

Waxaan u qoray inaan ku muujiyo dareenkayga ku aaddan waxa horumar kala duwan ka socdey welina ka socda dalka Turkiga muddadii uu hogaaminayey Madaxweyne Erdogan, waxaanan dareemayaa iney waajib igu tahay aniga iyo qof kasta oo wax qori kara inuu taariikhda markhaati uga noqdo horumarka mucjisada u eg iyo hogaaminta heerka sare ah ee Turkiga ka socota.

Waxaan u qoray in dadkayga soomaaliyeed iyo dadka kale ee caalamka dhamaan ee doonaya iney dalkooda horumar gaarsiiyaan, ama hogaamin fiican helaan, iney ku daydaan, horumarka iyo hogaaminta aan kitaabkan kaga sheekaynayo.

Ma inkiri karo inaan Turkiga iyo Erdogan labadaba jeclahay, qoraalkayguna - sidaa awgeed - yahay mid jacayl ku dheehan, isha wax jecelina horaa loo sheegay oo xumaanta cidda ay jeceshahay ma aragto, laakiin waxaan ku dadaaley inaan runta mar walba u dhowaado, waxaanan weli aaminsanahay waxa Turkiga ka dhacayey 18 sano ee u dambaysey (2003 ilaa 2021) ee horumar iyo is beddel baaxad weyn ah, inaan si dhab ah weli taariikhda loo gelin, sidaas ayaanan u go'aansaday

inaan kaalin - haba yaraatee - ka qaato in taariikhda la geliyo wanaagaas faraha badan, ee dhan walba nolosha leh, ee lagu dayan karo.

Jacaylkayga Turkiga maanta iyo maalin dhow toonna ma bilaaban, balse wuxuu soo bilawday 40 sano ka hor markii aan akhriyey taariikhda asaaskii Dawladdii Turkiga ee uu hogaaminayey Ertugrul oo ka bilaabatay markii uu aasiyada fog ka soo hijroodey, ee isagoo qabiilkiisii yaraa wata, u hiiliyey suldaankii Saljuuqiga ahaa ee dagaalka gaalada kula jirey, ka dibna wiilkiisii Cusman Ertugrul uu dawladii halkaa ka sii wadey oo asaasay dawladdii weynayd ee Cusmaaniyada loo bixiyey xukunkeeduna ku faafay saddexda qaaradood ee Aasiya, Afrika iyo Yurub.

Aniga oo mar walba akhriskaygu taariikhda u badnaa, ayaan haddana ilaa waagaas waxaan si joogta ah u akhrinayey Taariikhdii dawladdii Cusmaaniyada, Salaadiintii soo maray, gaar ahaan kuwoodii ugu caansanaa, Sida Suldan Maxamed Al-Faatix, Suldan Salim Yavus, Suldan Bayasiid Yildirim, Suldan Suleyman Qaanuuni, Suldan Cabdulxamiid, Dhamaantood naxariistii Janno Allaha geeyo.

Waxaan Ilaa 40 kaa sano akhrinayey Taariikhda iyo waxa ka dhacaya Turkiga, waxaan si dhow ula socdey ilaa 90^{dii} halgankii Prof. Erbakan Allaha u naxariisto, iyo soo if baxii hogaamiyaha cusub ee Recep Tayyip Erdogan markii uu noqday duqa magaala weynta uu jecelyahay ee Istanbul.

15^{kii} sano ee u dambeeyeyna si joogta ah ayaan u la socdey, mar aan imaado iyo mar aan akhriyo, waxa Turkiga ka socda, horumarka iyo is bedelka lixaadka leh ee ka hirgalay, iyo hogaaminta cajaa'ibka leh ee Madaxweyne Recep Tayyip Erdogan, Ilaahay ha xafido, waxa aan buugan ku qorayaana waa wax aan baaritaan iyo akhris ku sameeyey oo aan difaaci karo insha Allah.

Waxaan sameeyey cilmi baaris badan oo aan ku akhriyey qoraallo boqollaal ah oo isugu jira kuwa ay qoreen dadka jecel Madaxweyne Erdogan iyo Kuwo neceb oo reer galbeedka u badan.

Waxaan marar badan akhriyey qoraallada saxaafadda reer galbeedka wargeysyadooda ugu magac dheer sida New York Times, Washington Post, Time iyo Newsweek, Economist, Guardian iyo independent, oo mararka qaar ay ka tifqayso necaybka horumarka ka socda Turkiga iyo si gaar ah nacaybka Madaxweyne Erdogan, taasuna waxey daliil cad iigu

noqotay iney u neceb yihiin inuu ka shaqeeyo danaha dalka iyo dadka Turkiga.

Sidee ku bilawday buuganu?

Waxaan jeclahay Buugan qisadiisa iyo sida uu ku bilawday inaan wax yar akhristaha uga sheekeeyo si dhacdooyinka iyo qoraallada soo socdaa isugu xirmaan.

Muddo toban sano ka badan ayaan indhaha ku hayey dalka Turkiga, marar badanna aan soo marayey, aniga oo socoto ku ah magaalada Istanbul, mararka qaarna ayaamo joogaya si aan uga qayb galo shirar iyo aqoon is weydaarsi aan la wadaagayo ardayda iyo dadweynaha soomaaliyeed ee muddooyinkii dambe ku soo badanayey dalka turkiga, sidii uu booqashada ugu tegey Soomaaliya Madaxweyne Recep Tayyip Erdogan, xilligii uu dalka Ra'isul wasaaraha ka ahaa.

Waxaan mudadaasba u kuur gelayey oo wax badan ka akhrinayey arrimaha Turkiga si maalinle ah, aniga oo Turkiga jooga iyo aniga oo ka maqan, waxaan xusi karaa aniga oo jooga Maraykan ama Yurub ama Afrika ama carabaha, subaxa hore wargeysyada aan maalinka ku bilaabo ee aan akhriyo waxaa ka mid ah kuwa Turkiga iyo kuwa Malaysia, oo ay ka mid yihiin (Daily Sabah) iyo (Yeni Safak English) wararka soomaalida ka sokow, si aan mar walba u la socdo halka wax marayaan, Aniga oo dareemaya horumarka Turkigu inuu yahay horumarkayga, xooggooduna yahay xooggayga, nabad gelyadooda iyo xasiloondooduna tahay tayda, waayo waxaa na mideeya oo walaala naga dhigay Qur'aanka kariimka ah iyo sunnada nebigeenna calayhi salaatu wasalaam ee aanu ku wada abtirsanno.

Sannadkii 2009 bishii July, oo laga joogo 11 sano ayaan safar ka mid ah safaradayda ku maray magaalada Istanbul, habeennana ku dhaxay, waxaan xilligaas qoray silsilad 3 qormo ka kooban oo aan kaga faalloonayey arrimaha markaas Turkiga ka taagnaa oo maanta ka duwan. Waxaan silsiladaas ku daabacay bogga rugta internetka ee "somalitalk.com" waxaan hal ku dheg uga dhigay "Istanbuul iyo Casharrada Erdogan" oo aan u la jeedey dadka soomaaliyeed guud ahaan, gaar ahaanna inta aqoonta iyo siyaasadda iyo hogaaminta xiisaysa in aan u caddeeyo casharrada laga baran karo hogaaminta Recep Tayyip Erdogan.

Xukuumadda uu hogaaminayo Madaxweyne Erdogan oo maanta qaan gaadhey oo 17 jirsatey, xilligaas wexey ahayd mid weli curdin ah oo 6 sano keliya jirtey, waxaana socdey welina socda oo maalinna aan laga nasan - in kasta oo ay hadda aad u 'adkaatay - in xiddidada loo siibo, dhinacya kala duwanna lagaga yimaado, sida aad qoraallada ku arki doonto insha Allah.

Hayeeshee dadka walaaleheena ee Turkiga iyo hogaamintooda fiicani wexey ka boodeen debinna badan oo loo dhigay, welina loollan adag iyo cadow fara badan ayey u babac dhigayaan, siyaasad xirfadaysanna waa ku maaraynayaan caqabadahaas kala duwan ee la hor dhigayo, wexeyna guushaas ku gaadheen fadliga Ilaahay oo cidduu guusha siinayo aan wax joojin karaa jirin, ka Dibna hogaaminta wanaagsan ee Madaxweyne Erdogan iyo hawlwadeennada la shaqeeya ee uu ku xusho aqoonta, xirfadada iyo hawlka nimada.

Bishii Maarso 2020 Ayaan Ankara imi, waxaana isla markaaba adduunka qabsaday cudurka safmarka ah ee "Corona Virus - COVID-19", wexeyna taasi sababtay muddo dhawr bilood ah inaan guryaha ku xirnaano, halkaas oo aan fursad fiican uga helay inaan dib ugu noqdo shaqooyin badan oo qoraal iyo akhris ah oo ii yaalley.

Qoraalladaas aan dib ugu noqday, Waxaa ka mid ahaa qoraalladii silsiladda ahaa ee aan ka qoray hogaaminta Madaxweyne Erdogan 11 sano ka hor, Aniga oo ay muddadaas ii korodhay wax badan oo aan ka bartay ama ka akhriyey dalka Turkiga Iyo hogaaminta Madaxweyne Erdogan.

Muddo 11 sano ah wax badan ayaa is beddeley, dhacdooyin badan ayaa dhacay oo ay ugu khatarsanayd af gembigii dhicisoobey July 2016 ee la isku deyey in lagu mija xaabiyo guud ahaan dalka Turkiga Iyo horumarkiisa, gaar ahaanna hogaaminta Madaxweyne Erdogan, laakiin Ilaahay fashiliyey, dadka reer Turkiga iyo madaxweynohooduna si geesinimo leh uga hortageen kooxdii cadawga ahayd ee dooneysey iney Turkiga mijaxaabiso.

Wexey ila noqotay markaa inaan qoraallada iyo kuwo kale oo badan oo teel teel ahaa oo aan Turkiga iyo Istanbul iyo Suldan Maxamed Al Faatix ka qoray aan dib u jalleeco, isku duba rido, cilmi baarista aan sameeyey ku daro, ka dibna iyada oo bisil oo macaan aan akhristaha afka Soomaaliga ugu soo bandhigo, Aniga oo rajaynaya afaf kalena in buuga lagu daabaco, oo uu ka mid yahay afka Turkigu si ay u ogaadaan walaaleheenna Turkigu dareenka walaaltinimo iyo kal gacal ee aanu u hayno.

2009 Xaggee Xaalku Marayey?

Qoraallada aan maalinkaas qoray waxaad ka garan kareysaa meesha xaal mariyey 2009 xilli ay xukuumadda Xisbiga Cadaaladda iyo Horumarinta (AKP) ay muddo 6 sano oo keli ah markaas talada dalka haysey.

Wax badan ayaa 11 sano is beddeley, distuurka dalku waa is beddeley oo Erdogan wuxuu noqday Madaxweyne, jagadii Ra'isulwasaarahana meesha waa ka baxday, (Arrintaa qudheedu waa mid in aad loogu fekero u baahan, bal sida nidaamka awoodda la siiyo Madaxweynaha uu dalka wax badan uga bedeli karo shaqada iyo horumarka dalkana qayb weyn uga qaadan karo).

Muddadaas wax qabadka iyo horumarka uu hogaamiyuhu dalka u horseedey aad ayuu u kordhay marka la eego xisaabaadka iyo tirakoobyada, nolosha dadku wey sii fiicnaatay dhaqaale ahaanna wey u kortay, asxaabtii wada socotey ee xisbiga talada haya wey kala hadheen oo rag badan oo Madaxweyne Erdogan ay jaal ahaayeen ayey siyaasadda ku kala leexdeen, rag cusubna dhinaca madaxweynaha ayey ka soo muuqdeen, is beddeladaas oo dhammina macne weyn ayey u samaynayaan qofka doonaya inuu siyaasadda dalka iyo horumarkiisa wax ka ogaado.

Faalladii 2009 aan ka Qoray Turkiga iyo Hogaaminta Erdogan

Qoraalladaas oo sidaan sheegay 3 qaybood ahaa, haddaan soo koobo, ama wax ka soo qaado waxey u dhignayd sidan:

((Shalay 29/6/2009 ayaan ka soo duulay Nairobi aniga oo ku socda Shirka Jaaliyadaha Soomaalida Scandinavia ee ka dhacaya Goteborg, Sweden 2-5/7/2009. Xalayna waxaan ku nastay Caasimaddii Islaamka (Istanbul) weliba hodheel ku yaal xaafadda loogu magac daray Suldaankii Furtay Magaalada Istanbul, horana ugu magac dheerayd (Qostan tiiniya), Suldaan Muxammad Al Faatix Allaha u naxariisto, Janadiina ha ka waraabiyo.

Muddooyinkii u dambeeyey ee uu dalka hogaaminayey Wasiirka 1^{aad} Recep Tayyip Erdogan oo aan booqasho ama socoto geediya ku maray waddanka ilaa 12 goor, laba arrimood oo ku saabsan waddanka iyo hoggaanka xisbiga talada haya, oo si aad ah loo dareemi karo:

1. Horumarka dhaqaale iyo siyaasadeed ee waddanku gaarey sannadihii ugu dambeeyey.
2. Hoggaaminta siyaasadda iyo maamulka sarreeya ee xisbiga talada haya oo uu majaraha u hayo Wasiirka Koowaad Recep Tayyip Erdogan. Iyadoo xisbiga iyo kawaadirtiisaba uu ku 'socdo dagaal gudo iyo dibad ah oo aan kala go' lahayn.

Labadaas arrimood ayaa waxaa ka dhashay taageera aad u weyn oo xisbigu ka helay shacbiga Turkiga, shacbiyadaas oo noqotay buurta ay ku madax jabaan dhaafina kari waayaan dhammaan weeraradii isdaba joogga ahaa ee ay soo qaadeen dadka cadawga ku ah Turkiga gudo iyo dibad.))¹

Waxaan qoraalkaas ku xusay dhibaatooyinka lala damacsanaa xisbiga AKP oo Ilaahay ka badbaadiyey, oo xilligaa taagnaa, waxaanan u weriyey sidan soo socota:

((Waxaa laysku deyey laba goor in xisbiga si qaanuun ahaana siyaasadda looga saaro madaxdiisana xarig iyo maxkamad lala beegsado, waxaana falkaas oo si heer sare ah looga soo shaqeeyey lagu soo gunaanadey in Xeer ilaaliyaha Guud ee Dawladdu Maxkamadda Sare ee dalka u gudbiyey (buug) tibaaxaya arrimaha uu Xisbiga Caddaaladdu ku burburinayo Cilmaaninimada Dawladda Turkiga, kuna jebinayo Qodobada Dastuurka dalka iyo Qawaaniintiisa, sidaas darteedna uu Maxkamadda Sare ka codsanayo in Xisbigan si rasmi ah loo xiro, xoolihiisa lala wareego, 70 ka mid ah madaxdiisana xabsiga loo taxaabo, oo ay ugu horreeyaan, Wasiirka Koowaad Recep Tayyip Erdogan iyo Madaxweynaha Cabdalla Guul. Arrinkaasu Muddo 4 Bilood ah ayuu dalka gilgiley, lagana baqay in garsoorayaasha Maxkamadda Sare oo badankoodu Mu'asasada Cilmaaniyadda raacsan ay xukunkaas ridaan, waddankuna fawda galo, hayeeshee maxkamaddii wexey xukuntay in aan dacwaddaas waxba ka jirin, hal cod ayaana xisbigu xukunkaa kaga badbaadey Ilaahay fadligiis)).²

Qaybta 2^{aad} ee qoraalladaas silsiladda ahaa ee 2009 aan qoray waxaan wax kaga tilmaamay horumarka uu dalka u soo hoyey Xisbiga Cadaaladda, maal gashiga shisheeye ee faraha badan oo dalka soo galay taas oo lagu qiyaaso sare u kaca dhaqaalaha dalalka, waayo dalka waxaa soo geleysa

¹) Bogga somalitalk.com 3 Jul, 2009

²) Bogga somalitalk.com 3 Jul, 2009

lacag adag oo badan, dadweyne fara badan ayaa shaqo ka helaya, waxa soo gelaya muwaadinka iyo noloshiisa ayaa kor u keceysa.

Qaybta 3^{aad} ee qoraalladaas waxaan kaga hadlay shan dersi oo laga faa'iidayaan karo hogaaminta siyaasadeed ee Madaxweyne Recep Tayyip Erdogan, oo xilligaas ahaa Ra'iisulwasaare, waxaan ku sifeeyey hogaamintiisa wanaagsan iney calaamad u tahay dhawr astaamood oo sabab u noqotay inuu gaadho guulaha iyo horumarka dalkiisa u soo hoydey:

- 1) **Dersiga 1^{aad}**: Ujeedooyinka waaweyn ee la leeyahay laguma gaaro maalin iyo labo, sanad iyo labo wexeyna u baahantahay qorshe tallaabo tallaabo ah oo si hufan loo fuliyo, si xirfad lehna looga shaqeeyo, waana midda uu ku guulaystey Xisbiga Caddaaladda.
- 2) **Dersiga 2^{aad}**: Hoggaanka Siyaasiga ee guusha hanan kara waxaa lagama maarmaan ah inuu kasban karo Jacaylka Raciyadiisa ama shacabkiisa, xagga shakhsiyadiisa, tilmaamihiisa, shaqadiisa iyo maamulkiisa. Waana midda uu ku guulaystey Recep Tayyip Erdogan, kana dhigtay siyaasiga shacbiga Turkigu ugu jecelyahay mudda dheerna soo marin taageeradaas oo kale, wexeyna isku waafaqeen inuu ballanta uu qaado inuu ka soo boxo.
- 3) **Dersiga 3^{aad}**: Taageerada Shacbiga waxaa lagu heli karaa adeegyada bulshada oo la xoojiyo, wax barashadooda, caafimaadkooda, shaqooyinkooda iwm.
- 4) **Dersiga 4^{aad}**: Hoggaanka Qiimaha shacabkiisa u lihi waa inuu ilaaliyo himilooyinka dadkiisa, lana socdo dareenkooda iyo caadifadooda. Hadalladiisa iyo khudbadihiisa iyo mawaaqiftiisa waa inuu ku soo jiidan karo kal gacalka shacabkiisa. Erdogan waa siyaasi si wanaagsan arrintaas xariif ugu ah, wexeyna badanaa uga dhacdaa si dabci ah, waayo waa siyaasi geesinima leh, hadalkiisu cadyahay, caadifa Islaamiya leh. Waxaana mawaaqiftaas tusaale loogu soo qaadan karaa, khudbaddii lagu xiri jirey, difaacii nebiga calayhi salaatu wasalaam markii sawir gacmeedka laga sameeyey, ka kicitaankiisii shirkii Davos markii madaxweynaha yuhuudda damcay inuu duudsiyo dhiiga shacabka reer Falastiin, Erdogan si adag oo deg deg ah ayuu uga fal celiyey, fadhigiina si cadha leh ayuu uga kacay oo Istanbul ugu soo noqday isla habeenkiiba, taas oo aanu ku dhici karin masuul geesinimo leh oo dadkiisa iyo xaqa iyo cadaaladda ixtiraamaya mooyaane.
- 5) **Dersiga 5^{aad}**: Hogaamiyuhu ma aha inuu wax walba yaqaano, laakiin waa inuu yaqaan waxa uu rabo ama ku riyoonaayo. Erdogan wuxuu yaqaan sida uu hareerhiisa u dhigo rag aqoon iyo waaya aragnimo durugsan u leh fulinta iyo ka mira dhalinta aragtiyada iyo horumarka uu

rabo inuu dalka iyo dadka Turkiga gaarsiiyo, sidaa awgeed waxaa ku xeeran oo la shaqeeya koox ka mid ah dadka ugu aqoon sareeya xagga siyaasadda, dhaqaalaha, waxbarashada, caafimaadka, hawlaha guud iyo Kaabayaasha dhaqaale.))³

Qoraalladaas silsiladda ahaa ee waqtigaas aan ka qoray Horumarka Turkiga iyo casharrada laga baran karo hogaaminta Erdogan, waxaa laga joogaa muddo 10 sano ka badan.

Wax badan ayaa dhacay muddada 10^{ka} sano ah, Turkiga iyo adduunka, aniga laftayda wax badan ayaa iska kay beddeley, oo arrimaha dalkan muddadaas waan u sii kuur gelayey waxaana iiga kordhay wax badan oo aqoon iyo waaya aragnimo iyo akhris aan u sii yeeshay Turkiga iyo Madaxweyne Erdogan, taas oo ka muuqan doonta insha Allahu cutubiyada uu buugani ka kooban yahay.

Agembigii FETO ee Dhicisoobey July 2016

Xagga Turkiga iyo wixii tobankaan sano soo maray waxaa ugu weynaa qiyaastayda afgembigii qolada loo yaqaan guulinistayaasha ama (FETO) oo saraakiil ka tirsan ciidamada qalabka sida ee turkiga isku dayeen 15 July, 2016 iney talada kaga ridaan Madaxweyne Erdogan iyo xisbigiisa, balseba ay qorsheeyeen iney dil gaadma ah ku khaarijiyaan Madaxweyne Erdogan (Ilaahay ha xifdiyo) talada dalkana la wareegaan.

Dhacdataasu wexey ahayd mid si xeel dheer loo soo agaasimey, xoogag dibadda iyo gudaha isugu jirana gacan ka haysatey, hayeeshee si fiican loogu guul darraystay, lana soo af jaray waagu inta aanu dillaacin, iyadoo dhaq dhaqaaqeedu bilawday 9^{kii} fiidnimo.

Wuxuu is ku daygaas 15 July ahaa kii ugu khatarsanaa ee cadawga dalka iyo dadka Turkigu soo maleego, laakiin Ilaahay garabkooda waa ka baxay, waayo Ilaahay ma toosiyo mana taageero hawlaha dadka fasahaadda iyo fitnada wada, sidaas ayeyna ku jabeen, Ilaahayna guusha ku siiyey Madaxweyne Erdogan iyo shacabka Turkiga oo si geesinimo leh uga horyimi isku daygaas fulaynimada ahaa.

³) Bogga somalitalk.com Aug. 2, 2009

Cutub ka mid ah ayaanan ku faah faahin doonaa arrinta isku dayga afgembiga iyo qolada FETO ee ka dambaysey.

Qaybaha Cusub

Haddaba si qoraalladu isu qabsadaan, waxaan intii hore ku kabayaa, dhawr qodob oo dhamaystir u noqon kara, isla markaana soo koobi kara xaaladda dalka Turkiga iyo hogaaminta Madaxweyne Erdogan, oo xilligii hore ee aan qoraallada qoray (2009) ahaa Ra'iisul Wasaare, maantana ah Madaxweynaha dalka, iyadoo jagadii Ra'iisulwasaaruhu meesha ka baxday ka dib is beddelka lagu sameeyey distuurka dalka.

Qodobada aan jeclahay inaan ku kabo qoraallada waxaa ka mid ah:

- 1) Wax qabadkii iyo horumarkii xukuumadda Xisbiga Cadaaladda ee uu hogaanka u hayo Madaxweyne Erdogan ku soo kordhisey dalka iyo dadka Turkiga tobankaas sano ee u dambeeyey.
- 2) Sababta ka dambaysa in dadka Turkidu mar walba doorashada codka ugu badan siiyaan xisbiga Madaxweyne Erdogan, 2003 ilaa maanta.
- 3) Astaamaha hogaaminta uu leeyahay Madaxweyne Erdogan ee u suurta gelisey inuu dadkiisa in badan qalbigooda hanto, in kalena danta guud ku taageerto, dalkana uu u horseedo is beddel iyo wax qabad aan horay u soo marin.

Qodobadaas ayaan soo koobi doonaa insha Allah, aniga oo kaashanaya xogta aan ka hayo dalka Turkiga oo muddadaasba aan u kuur gelayey saddexdii sano ee u dambayseyna aan waqtiya badan oo kala duwan dhexdiisa ku sugnaa.

Waxaan kale uu buuga kaga hadlayaa xiriirka Turkiga iyo Soomaaliya iyo sida Turkiga hiil iyo hooba ula garab taagantahay walaalhooda Soomaaliyeed, tartanka adduunka iyo sida uu isugu noolyahay ama u kala faa'iidaysto, hoggaanka is bedelka keeni kara guud ahaan iyo astaamihiisa iyo hagar daamooyinka Turkiga lala damacsanaa ee Ilaahay ka badbaadiyey.

Waxaan rajaynayaa iney akhristaha fikrad guud oo fiican ka siin doonto (soo if baxa Turkiga) oo la oran karo waa quwad caalami ah oo adduunka quwadaha ku loolamaya ku soo korodhay sanadahan dambe ee uu Madaxweyne Erdogan iyo Xisbigiisa Cadaaladdu ay talada dalka hayeen.

Waxaan Ilaahay uga baryayaa Madaxweyne Erdogan iyo dadka la shaqeeya inuu khayrka iyo wanaagga waafajiyo taas oo horumar iyo wanaag u ah shacabka Turkiga iyo muslimiinta guud ahaan iyo caalamka intiisa wanaagga jecel oo dhan.

Wabillahi Tawfiiq.

Maxamed Idris Axmed
Ankara, 1/3/2021

CUTUBKA 1AAD

MARXALADAHA SIYAASADDA EE TURKIGA KA HOR XISBIGA CADAALADDA IYO HORUMARINTA

***“Annagu Waxaanu Nahay Ummad Aan Ilaahay Mooyaane Cid Kale u
Rukuucin ama u Sujuudin”.***

Recep Tayyip Erdogan

CUTUBKA 1AAD

MARXALADIHII SIYAASADDA EE TURKIGA KA HOR XISBIGA CADAALADDA

Dalka Turkiga waa dal Muslim ah, dadkiisu 99% Islaamka haysto oo sunni yahay, taariikh qoto dheer ku leh islaamka, dawladdii Cusmaaniyada ee uu asaasay ninka loogu magac daray (Cusmaan Qaasi) 1299 ilaa laga rido 1923, wexey caalamka hogaamineysey 624 sano, dhul baaxadiisu leegtahay 22,991,411 km sq. Mana jirto taariikhda aadanaha dawlad aan iyada ahayn oo dhul intaas leeg xukuntay.

Waxaa matxafyada Turkiga weli yaal 3,000,000 doc. oo dawladii Cusmaaniyada taariikhdeeda ku saabsan oo aan weli wax laga qorin, iska daa inta taalla mataaxifta reer galbeedka Serbia, ama Hungary, ama Austria iyo dalalkii ay dawladdaasu la micamili jirtey.

ka dibna waxaa la asaasay Jamhuuriyadda Turkiga 1924, oo ilaa maanta soo socotey heerar kala duwanaa soo martay.

Hogaankeedii u horreeyey waxaa jamhuuriyadda qabtay Mustafa Kemal Atatürk 1923 markii uu meesha ka saaray dawladdii cusmaaniyada, heshiiskii uu ku saxiixay magaalada Lausanne ee dalka Switzerland, wuxuuna hoggaanka u hayey ilaa uu ka dhinto 1938.

Jamhuuriyadda uu hogaaminayey Atatürk wexey dalka ku cadaadisey nidaamka cilmaaniga ah, wexeyna bedeshey qoraalkii carabiga ahaa, wexey amartay in lagu addimo afka Turkiga, wexey amartay in la raaco waddada reer galbeedka oo loo ekaado.

Muddadii 80 sano ahayd ee ka horreeyey Xisbiga Cadaaladdu inta aanu talada qaban 1923 - 2003 waxaa dalka isaga dambeeyey madax kala duwan, waxaa soo maray nidaam xisbiyo iyo talisyo uu hogaaminayo ciidanku oo talada xoog iyo af gembii kula wareegey.

1960 Ciidamada ayaa af gembii talada kula wareegey, wexeyna xireen Ra'isul wasaarihii la doortay ee dalka fur furay, oo adaanka soo celiyey, waxbarashada diintana iskuullada ku soo celiyey, taasoo ahayd rabitaanka shacabka Turkiga ee Muslinka ah oo barnaamijkaas ku doortay Cadnan Mandares, hayeeshee ciidamadu waa xireen ka dibna dil ayey ku fuliyeen 1961.

1971 Waxaa dhacay afgambi labaad oo ciidamadu talada kula wareegeen markii ay warqad u direen Ra'iisul Wasaarihii xilligaas Suleyman Demirel, ayna ku amreen inuu is casilo, wuuna ku khasbanaaday, wuxuuna dalku mar kale galay xukunka milliteriga.

Wuxuu markaa dalku galay xaalad deganaansho la'aan siyaasadeed, waxaana dhisantay saddex xukuumadood oo uu hogaaminayey Ra'isul Wasaare Suleyman Demirel 1975, 1977 iyo 1979 oo ka kooban xisbiyo kala duwan.

1980 Waxaa dhacay afgembigii saddexaad ee ciidamada ee uu hogaaminayey Jeneraal Kenan Evren, oo talada dalka la wareegey, waxaana lagu tilmaamaa inuu cadaadis badan dalka geliyey, distuurka laalay, barlamaankiina kala diray, ilaa uu distuur cusub afti u qaado, ka dibna uu Evren noqdo Madaxweynaha dalka ilaa 1989.

Marxaladdaas xisbiyada cusub la ogolaaday waxaa soo baxay xisbigii Turgut Ozal iyo saaxiibadiis oo waxyaaba badan oo fur furnaan ah dalka ku soo kordhiyey gaar ahaan dhanka dhaqaalaha iyo bulshada, waxaana la oran karaa wuxuu gogol xaadh u ahaa is beddelada uu keeni doono Xisbiga Cadaalada iyo Horumarinta ee masraxa siyaasadda soo galay 2002.

1995 waxaa la qabtay doorashooyinkii fur furnaanta ka dib waxaana ku guulaystey kuraasta ugu badan xisbiga Refah ee uu hogaaminayey Prof. Necmettin Erbakan, waxaana saraakiishiisa muuqata ka mid ahaa Recep Tayyip Erdogan, oo 1994 noqday duqa magaala weynta Istanbul.

Prof. Erbakan wuxuu noqday Ra'iisulwasaaraha hogaaminaya xukuumadda. Tansu Ciller oo xulafadiisa ahaydna wexey noqotay Ra'iisul wasaare ku xigeen iyo wasiirka arrimaha dibadda, hayeeshee xukuumadda Erbakan waqti badan ma sii socon, ciidamada oo indhaha ku hayey darteed.

1997 Ciidamadu wexey hordhigeen Prof. Erbakan 18 qodob ee la sheegay inuu ku khilaafay ama ku bur burburinayo nidaamkii cilmaaniga ahaa ee Jamhuuriyadda, uuna rabo inuu Islaami ka dhigo, waxaana lagu cadaadiyey inuu is casilo xilkana wareejiyo sidaas ayaana dhacday, ka dibna xisbigiisi Refah amar maxkamadeed ayaa lagu joojiyey albaabadana loo laabay.

Refah ka dib asxaabtii Erbakan wexey asaaseen xisbi la yiraahdo (Fadiila), kaasoo aan waqti badan jirin, waayo maxkamadda distuuriga ayaa isagana

SH. MOHAMED IDRIS AHMED

HORUMARKA **TURKIGA** & HOGAAMINTA ERDOĞAN

Mahad oo dhan Ilaahay baa leh, Nabad Iyo naxariisina nebigeenna `korkiisa ha ahaato.

Maxaan u qoray buugan: Horumarka Turkiya iyo Hogaaminta Erdogan?
Waxaan u qoray inaan kaga hadlo oo akhristaha afka soomaaliga iyo afafka
kaleba ugu weriyo dareenkayga labada qaybood ee kitaabku ka kooban yahay
oo ah:

Horumarka uu gaarey dalka iyo dadka turkigu oo aan indhahayga ku arkay,
muddo dheerna aan la socdey oo u kuur gelayey, iyo qaybta labaad oo aan ku
werinayo hogaaminta wanaagsan ee Madaxweyne Recep Tayyip Erdogan
Ilaahay ha xafido oo udub dhexaad u ah horumarkaas Turkiya u hirgalay.
Waxaan u qoray inaan ku muujiyo dareenkayga ku aaddan waxa horumar kala
duwan ka socdey welina ka socda dalka Turkiga muddadii uu hogaaminayey
Madaxweyne Erdogan, waxaan dareemayaa iney waajib igu tahay aniga iyo
qof kasta oo wax qori kara inuu taariikhda markhaati uga noqdo horumarka
mucjisada u eg iyo hogaaminta heerka sare ah ee Turkiya ka socota.



Sh. Mohamed Idris Ahmed

Wuxuu ku dhashay Degmada Qandala Gobolka Bari, Somalia Qiyaasta Sanadkii 1957.

Wuxuu Tacliinta Hoose ilaa sare ku qaatay Qandala, Muqdisho, Cadan dalka yemen, ilaa 1976.

1977 Wuxuu Tegey Dalka Sucuudiga, Wuxuu Qur'aanka ku Xifdiyey Masjidka Xaramka ee Makka, Wuxuu-
na Cilmiga ka raacday Culimadii Islaamka ee Casrigaas Joogtey labada Xaram.Wuxuu Shahaadada
Heerka laad iyo 2aad Ka sameeyey **Jaamacadda American Islamic University, Washington**, iyo
Jaamacadda University of South Africa.


Wuxuu ka qayb qaatay Dacwada Bulshada Soomaaliyeed Gudaha Dalka iyo Dibadiisa.

Wuxuu Imaam, Dhaaci iyo Madaxa Golaha Imaamyada Soomaaliyeed

Ka noqday Dalka Maraykanka, laga bilaabo 1997.

Wuxuu ka qayb qaatay Dacwada iyo dhismaha Masaajidda iyo Maraakista Qurbajoogta
Soomaaliyeed **Maraykanka, Canada, Europe iyo Africa**, welina uu safara kala duwan ku
bixiyaa.

Wuxuu Qoray buugaag badan iyo kumanyaal Maqaallo Carabi iyo Soomaali isugu jira,
kutubta la daabacay waxaa ka mid ah: Innaga iyo Xabashida, Sh. Ibnu Baaz Taariikh
nololeed kooban, Qisooinka Cajaa'ibta Sadaqada, Socdaalka Geerida, Miraha Kharaar-
Dagaaladii & Qaran jabkii Soomaaliya, Qisadii Horumarka Malaysia iyo kuwo kale.



ISBN: 978-1-5136-8421-5



9 781513 168421

PERDANA
HADESHIP
COLLECTION
YATASAN
KEPIMPINAN
PERDANA